



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **22/01/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanyaasha hoos ku Xusan:-

WAKIILKA ISKA IIBIYAHA:- NURIA ELMI KATHIYE, Hooyo: Madiino Xaashi Muxumed, Somali ah, Ku Dhalatay: Mandhera, Sanadkii: 1979, Sita: Kenya Pass.l.r., Lr. AK0164816

IIBSADE:- MAHAD ABDI, Hooyo: Nuuro Cali Guuleed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1985, Degan UK, Sita: British Pass.l.r., Lr. 556571879

WAKIILKA IIBSADAHA:- Istarliin Cabdi Cismaan, Somali ah, Degan Muqdisho

TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO
Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, Cabirka: **(20X30)-M**, Looto No: **3472-3474-F3**, W.M.L: **(8666/2017)**, Tr. 27/05/2017, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)

SOOHDINTA DHULKA
Bari: Dhul dad, Koonfur: **Jid**, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad
QIIMAHA DHULKA: USD \$19,000 (Sagaal Iyo Toban Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **NURIA ELMI KATHIYE**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyay **MAHAD ABDI** Dhul banaan oo tilmaamahoodu sare ku xusan yihiin, uuna ku qoran yahay **Axmed Cali Axmed**, Kuna gaday Wakaalad Guud Ref:- 73066/MPN/2020, Tr. 11/01/2020, Kana soo baxday Nootaayo Muqdisho, uuna Saxiixay Dr Saciid Cali Cosoble, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadaynayaa in aan u Qaday Axmed Cali Axmed Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **ISTARLIIN CABDI CISMAAN** Ahna Wakiilka Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan u Gudoomay Iibsadaha Milkiyada Dhulkaan una Saxiixay Beecan.

J- Anaga oo Kala ah 1-Maxamed Ibraahim Afrax, 2-Maxamed Xasan Cali 3-C/llaahi Maxamed Jayte Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecan.

X- ASALKII HORE: Iftiin Caynte Fiidow RL:- 125912, Tr. 13/04/2015, Sabarlog No: 112/12/2015, Tr. 14/04/2015, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose ee Muqdisho Cabirka (20X60)-M Looto No 3472-3474-3476-3478-F3.

SAXIIXA WAKIILKA ISKA IIBIYAHA

NURIA ELMI KATHIYE

SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA

ISTARLIIN CABDI CISMAAN

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMED IBRAAHIM AFRAX

2- MAXAMED XASAN CALI

3- C/LLAHI M/ED JAYTE

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 498/T.P.N/23, Tr. 22/01/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **Nuria Elmi Kathiye** Ahna (Wakiilka Iska iibiyaha), 2- **Istarliin Cabdi Cismaan** Ahna Wakiilka Iibsadaha) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtaayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Cirro



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

MASAWIRKA WAKIILKA ISKA IIBIYAHA

NURIA ELMI KATHIYE



MASAWIRKA WAKIILKA IIBSADAHA

ISTARLIIN CABDI CISMAAN



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

M/ED IBRAAHIM AFRAX



MAXAMED XASAN CALI



C/LAAHI M/ED JAYTE



MASAWIRADA LABADA WAKIIL

NURIA ELMI KATHIYE & ISTARLIIN CABDI CISMAAN





JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

Rep.n 8666/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIJBAALE AH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay 27/05/2017, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Mudane **Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud**, hooyadiisna la yiraahdo Isniino Cali Jimcaale ahna Soomaali, kuna dhashay Degmada Cadaado, sanadkii 1953, lehna warqadda Baabuur wadista ee lambarkeedu yahay 7961 ee Wasaaradda Gaadiidka, ahna laga iibsadaha dhulka;=====
- 2) Mudane **Axmed Cali Axmed**, hooyadiisna la yiraahdo Nuray Cali Kediye, ahna Soomaali, kuna dhashay Muqdisho, sanadkii 1989, ahna iibsadaha dhulka, kaasoo beeca dhulka uu uga wakii yahay Mudane **Cabdinuur Aadan Cabdi**.=====

Wakiilka iibsadaha dhulka iyo laga iibsadaha dhulka, anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Mudane Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud wuxuu Mudane Axmed Cali Axmed ka iibiyey dhulkiisa ah 20x30, lana mid ah 600MQ, kuna qoran lotto lambar: 3472 iyo 3474-F3, kuna yaalla Degmada Hodan, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan USD 6,000 (Lix kun oo doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas wuxuu ka mid yahay dhulka Mudane Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud uu ku yeeshay qoraalka lambarkiisu yahay 4925/2016, taariikhdiisuna tahay 10/07/2016 ee uu qoray Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil). Dhulkaas waxay sohdimihiiisu yihiin sidatan: **Koonfur** waxaa ka xiga jid, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, wakiilka iibsaduhuna wuxuu caddaynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu Mudane Axmed Cali Axmed u iibiyana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen. Qoraalkaan waxaa iibsadaha dhulka u qaaday, una saxiixay Mudane **Cabdinuur Aadan Cabdi**.=====

SAXIIXA LAGA IIBSADAH DHULKA

- 1) Mudane Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud

SAXIIXA WAKIILKA BEECA DHULKA

- 1) Mudane Cabdinuur Aadan Cabdi

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

- 1) Mudane Xasan Axmed Afrax
- 2) " Maxamed Cabdifitaax Cismaan

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 4ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.=====



NOOTAAYO

Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)

Bee

R. 498/T.P.N/23

T. 22/01/23

20x30.M

L. 3472-3474-83

Dawladda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia

Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka | Driving License



L/Aqoonsiga - License No

7961

Magaca - Name

Mohamed Kahiyeh Farah

Jinsiyadda - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

01/01/1953

Meesha laga Bixiyey - Place of Issue

Muqdisho

Heerka Gaadiidka - Vehicle Type

D



Taariikhda La Bixiyey - Issued Date

07/09/2015

Taariikhda uu Dhacayo - Expiry Date

07/09/2018

Signature



SOMALIA



XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay **11/01/2020**, anigoo ah **Dr. Saciid Cali Cosoble**, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

WAKAALAD BIXIYE: Ahmed Ali Ahmed, Hooyo: Nuria Elmi Kathiye, Somali ah, Ku Dhashay: Mogadishu, Sanadkii: 1989, degan Norway, Hadana ku Sugan Muqdisho, Leh: Norway Passport NO. 33213027.

LA WAKIISHE: Nuria Elmi Kathiye, Hooyo: Madiino Xaashi Muxumed, Somali ah, Ku Dhalatay: Mandere, Kenya, Sanadkii: 1979, degan Mogadishu, Leh: Kenyan Passport, NO. AK0164816

WAKAALAD BIXIYE: Aniga oo ah Ahmed Ali Ahmed, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan wakiishay Hooyaday Nuria Elmi Kathiye una wakiishay wakaalad guud in ay ii maamuli karto, xafidi karto, ku iibin karto qiimihii ay u garato, hibeyn karto, kireyn karto, rahan galin karto, ka saari karto, saxiixi karto kaalinteyda, maslaxaad ka gali karto, u doodi karto, una dacwoon karto oo qareen u qaban karto haddii laga fursan waayo, dhamaan hantideyda oo idil gurto iyo maguurto mood iyo noolba, waxaan mar kale sii caddeynayaa in Nuria Elmi Kathiye awoodaas aan siiyey ay u madax banaan tahay oo aniga wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

LA WAKIISHE: Aniga oo ah Nuria Elmi Kathiye, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in aan aqbalay awooda uu i siiyay Wiilkayga Ahmed Ali Ahmed, isla markaana aan xilkaas uga soo bixi doono si hufan oo shareecada Islaamka waafaqsan Inshaa Allaah.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah C/nuur Aaden Cabdi iyo Maxamed Kaahiye Faarax, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay wakaalada guud ee sare ku xusan.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

AHMED ALI AHMED.

Ahmed Ali A.

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

NURIA ELMI KATHIYE

Nu

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- C/NUUR AADEN CABDI

2- MAXAMED KAAHIYE FAARAX

Rep. 73066/MPN/2020

(CADDEYN TA NOOTAAYAHA)

Tr. 11/01/2020

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1-Ahmed Ali Ahmed, (ahna wakaalad bixiyaha), 2-Nuria Elmi Kathiye, (ahna la wakiishaha), iyo waliba labada nin ee soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiis kaan igula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, caafimaad qaba, xiskooduna taam yahay, cid khasbeysana aysan jirin
By: C/fitaax

NOOTAAYAHA

DR. SACIID CALI COSOBLE



Dr. Saciid Cali Cosoble


MASAWIRKA WAKAALAD BIXIYAHA

Ahmed Ali Ahmed.



MASWIRKA LAWAKIISHAHA

Nuria Elmi Kathiye



MASAWIRKA MARAGA 1-AAD,

C/nuur Aaden Cabdi.



MASAWIRKA MARAGA 2-AAD

Maxamed Kaahiye Faarax





JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA AFGOOYE

Rep.n 4925/2016

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIJBAALE AH

Afgooye, maanta oo taariikhdu tahay **10/07/2016**, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Afgooye, xafiisna ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Marwo **Aftiin Caynte Fiidoow**, ahna 66 sano jir, hooyadeedna la yiraahdo Aamino Cali Muudeey, ahna Soomaali, kuna dhalatay Muqdisho, masawirkeeduna warqaddaan ku dheggaan yahay, ahna Marwada dhulka laga iibsaday, taasoo dammiinu aqoonsi uu ka yahay **Eng. Salaad Cali Axmed**, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay **P00117063**;=====
 - 2) Mudane **Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud**, hooyadiisna la yiraahdo Isniino Cali Jimcaale, ahna Soomaali, kuna dhashay Degmada Cadaado, sanadkii **1953**, ahna iibsadaha dhulka.=====
- Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Marwo Aftiin Caynte Fiidoow waxay Mudane Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud ka iibisey dhulkeeda ah **20x60**, lana mid ah **1,200MQ**, kuna qoran lotto lambar: **3472, 3474, 3476** iyo **3478-F3**, kuna yaalla Degmada Hodan, waxayna kaga iibisey dhulkaas lacag dhan **USD 8,000** (Siddeed kun oo doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray Marwada dhulka laga iibsaday, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas waxay Marwo Aftiin Caynte Fiidoow ku yeelatay xaashida lacag qabashada ee lambarkeedu yahay **125912**, taariikhdeeduna tahay **13/04/2015** iyo warqadda lahaanshaha dhulka (**Sopralluogo**) ee lambarkeedu yahay **125912**, taariikhdeeduna tahay **14/04/2015**, **Bollettario No. 112**, **Bolletta No. 12** ee Dowladda Hoose Muqdisho. Dhulkaas waxay sohdimihiiisu yihiin sidatan: **Bari** iyo **Koonfur** waxaa ka xiga jidad, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsaduhuna wuxuu caddaynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu la wareegana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, waxay Marwada dhulka laga iibsaday qoraalkaan ku caddaynaysaa inay masuul ka noqon doonto wixii ceebaal ah ama durid sharci ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran warqaddaan oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

- 1) Marwo Aftiin Caynte Fiidoow (libiso) _____
- 2) Mudane Maxamed Kaahiye Faarax Maxamuud (libsade) _____

SAXIIXA DAMMIINU AQOONSIGA

- 1) Eng. Salaad Cali Axmed _____

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

- 1) Mudane Xasan Axmed Afrax _____
- 2) " Cabdinuur Aadan Cabdi _____

SAXIIXYO LA SUGAY


Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Afgooye, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna ganceen.=====

NOOTAAYO

Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)



Waxaa Ceissey
20X30 W/347283474-F3
Rgn 8666/2017
T/27/05/2017





235/015

20X60

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA

Hoda

3472-3474

3476-3478

Xaashida lacag Qabashada No.: 125912

Mud / Mar. iftin Caynten fiidow

Waxaan ka qabtay Sh. So. 24000000 Caba Malay

70 Afar Boq Waf the

oo ah 62 Boq

Muqdisho 13/04/015

Qofka Lacagta Bixiyay
Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga



Hooda

BAWI'ADDA HOOSE EE MUDISHO



Waxaa la iibsaday

20X60,

Ln: 3472, 3474,

3476 iyo 3478-83

Rep.n: 4925/2016

Tr: 10/07/2016



Ministry of Education, Youth and Sports
Somalia



DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO WAAXDA DHULKA

No.: 125912

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi : 125912

Taariikh : 11-4-2015



Bohettario No.: 112

Bohetta No.: 12

Sannadka : 2015

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.: IFTiin Caynte Fiidow

Ug.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah 20 X 60 oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg Dej-kay (kuna yaal Xaafadda Hodon Soohdintiisuna tahay 3472

X. Woqooyi _____ X, Galbeed _____ X, Bari 3474

iyo Koofur _____ 3476

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta 3478

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid. F3

Warqadda lacag qaabashada No. 125912 13-4-2015

Muqdisho, Taariikh 11-4-2015

Agaasimaha Waaxda Dhulka

[Signature]



Duqa Magaalada

[Signature]



waxaa la iibsaday

20x60,

Ln: 3472, 3474,

3476 iyo 3478-93

Repin: 4925/2016

Tr: 10/07/2016



152515

152515
W-N-102

WARGAADA LABAASHA DHEXA

IF TIN
COUNTS
FII BOW

152515
152515
152515
152515
152515

152515
152515



152515

152515



L.md/xw/ 520 /2014

Ujeeddo: sugis iyo dhaxalkoob,

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 10/09/2014 waxaa maxkamada horteeda yimid labada markhaati oo kala ah: 1.C/laahi Cali Maxamuud (Dhiciis) soomaali ah, hooyo tahay Caasho Kheyre kuna dhashay Gal-hareeri jira 41.sanno degan C/biyaha, lehna (sawirka warqadaan ku dhegan), Maraga 2.Salaad Cali Axmad soomaali ah, hooyo tahay Xaliimo Abuukar kuna dhashay xamar sanadkii 1952dii degan xamar, lehna (sawirka warqadaan ku dhegan), waxa ay maxkamada horteeda ka cadeeyeen oo yiraahdeen: Anagoo ah mudanayaasha magacyadoodu kor ku qoran yihiin, kana caafimaad qabna maskaxda iyo jirkaba cidna qasabteynay aysan jirin qowl iyo ficilba waxaan halkaan si wadajir ah ugu cadeynaynaa in uu geeriyootay **Marxuumad Makaay Weheliye Toxoow**, waxa ayna ka tagtay oo dhaxalkeeda iska leh 3.qof oo kala ah wiil iyo 2.gabdhood, ku waasoo ah wax ay dhashay mana jirto cid kale oo dhaxleysa waayo labadiisi waalid waa ka geeri horeeyeen caruur kalena ma lahan waana kuwaan saxiixa:===

1. Axmad Cali Muudeey wiilka marxuumada isna marxuum ah,
2. Faadumo Cali Muudeey gabadha marxuumada iyana marxuumad ah,
3. Aamino Cali Muudeey gabadha marxuumada iyana marxuumad ah,
- 4.

Marxuumad Faadumo Cali Muudeey gabadha marxuumada iyana marxuumad ah waxaa dhaxlaya oo dhaxakeeda iska leh,

- 1.Nuur Abuukar Maxamed isna marxuum ah,2.Cusmaan Abuukar Maxamed isna marxuum ah,3.Xuseen Abuukar Maxamed, 4.Faadumo Abuukar Maxamed,5.Guuro Abuukar Maxamed, 6.Cadeey Abuukar Maxamed 7.Aamino Abuukar Maxamed,8.Xaliimo Ibraahim Maalin,

Marxuumad Aamino Cali Muudeey gabadha marxuumada iyana marxuumad ah waxaa dhaxlaya oo dhaxakeeda iska leh,

Aftiin Caynte Fiidoow iyo Nuur Axmad Cali oo dhaxaljojis ah,

Waxaa la Hibeeyay
20X15 Ln: 3509-F3
Rep.n: 1158/2015
Tr: 05/07/2015

Waxaa la iibsaday
20X60,
Ln: 3472, 3474,
3476 iyo 3478-F3
Rep.n: 4925/2016
Tr: 10/07/2016

Waxaa la iibsaday
20X15, Ln: 3507-F3
Rep.n: 4926/2016
Tr: 10/07/2016

Waxaa la iibsaday
20X30,
Ln: 3468 iyo 3470-F3
Rep.n: 4930/2016
Tr: 10/07/2016

Waxaa la iibsaday
20X15, Ln: 3464-F3
Rep.n: 4928/2016
Tr: 10/07/2016

Waxaa la iibsaday
20X15, Ln: 3466-F3
Rep.n: 4929/2016
Tr: 10/07/2016

Marxuum Axmad Cali Muudeey wiilka marxuumaka isna marxuum ah waxaa dhaxlkiisa iska leh oo dhaxalaya,

1.Nuur Amxad Cali 2.Nuuno Amxad Cali 3.Waliyo Amxad Cali 4.Guuro Amxad Cali 5.Xaliimo Amxad Cali 6.Aamino Amxad Cali 7.Timiro Amxad Cali 8.Maquul Amxad Cali,=====

waxaan kaloo caddeynaynaa in marxuumkaasi uu ka tegey tarako ka kooban dhul dhan 74,boos oo kiiba yahay 20X15, ee ku yaala degmada Hodan deegaanka Garsbaaleey, jihoyinkiisu kala yihiin:waqooyi waxaa ka jira Reer Axmad Shuqaale Cabdi, Galbeed waxaa ka jira Reer Xasan Yuusuf, Konfur waxaa ka jira Reer Xuseen Cali Axmad, Barri waxaa ka jira Reer Cali Axmad, waxaan kaloo cadeynaynaa in qof waliba la siiyay dhulka ku hor qoran iyo lambaradiisa;=====

1. Nuur Axmad Cali waxa uu helay 13.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3506.3508.3465.3467.3469.3471.3473.3475.3477.3479.3391.3392.3393.3408-nus.=====
2. Aftiin Caynte fiidoow waxa ay heshay 10.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3507.3509.3464.3466.3468.3470.3472.3474.3476.3478.=====
3. Waliyo Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3404.3406.3407.3409.=====
4. Nuuno Axmad cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3386.3388.3390.3389.=====
5. Aamino Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3367.3369.3371.3373.=====
6. Guuro Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3374.3375.3376.3377.=====
7. Xaliimo Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3450.3451.3451.3453.=====
8. Raaxo Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3454.3455.3456.3457.=====
9. Timiro Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin: 3458. 3459. 3460. 3461.=====



10. Maquul Axmad Cali waxa ay heshay 4.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3462.3463.3504.3505.=====
11. Nuur Abuukar Maxamed waxa uu helaay 3.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3485.3487.3489.=====
12. Xuseen Abuukar Maxamed waxa uu helay 5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3502.3503.3492.3494.3490.=====
13. Cusmaan Abuukar Maxamed waxa uu helay 3.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3491.3493.3495.=====
14. Faadumo Abuukar Maxamed waxa ay heshay 1.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3483.3480-nus.=====
15. Guuro Abuukar Maxamed waxa ay heshay 1.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3482.3480-nus,=====
16. Cadeey Abuukar Maxamed waxa ay heshay 1.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3488.3408-nus,=====
17. Xaliimo Ibraahim Maalin waxa ay heshay 1.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3481.3408-nus.=====
18. Aamino Abuukar Maxamed waxa ay heshay 1.5.boos oo lambaradoodu kala yihiin:3484.3486-nus.=====
19. C/laahi Cali Weheliye waxa uu shaqo u helay 8.boos oo lamb, kala yihiin: 3368. 3370. 3372. 3497. 3498. 3499. 3500. 3501.=====



Saxiixa Dhaxaltoyada

1. Xuseen Abuukar Maxamd _____
2. Faadumo Abuukar Maxamd _____
3. Guuro Abuukar Maxamd _____
4. Cadeey Abuukar Maxamd _____
5. Aamino Abuukar Maxamd _____
6. Xaliimo Ibraahim Maalin _____
7. Aftiin Cayte Fiidoow _____
8. Nuur Axmad Cali _____
9. Nuuno Axmad Cali _____
10. Waliyo Axmad Cali _____
11. Guuro Axmad Cali _____
12. Xaliimo Axmad Cali _____
13. Aamino Axmad Cali _____
14. Timiro Axmad Cali _____
15. Raaxo Axmad Cali _____
16. Maquul Axmad Cali _____

Saxiixa Sugayaasha

- C/laahi Cali Maxamuud (Dhiciis) _____
- Salaad Cali Axmad (Gofley) _____

Maxkamadu: Markii ay aragtay marag furka markhaatiyaasha la horkeenay oo caddeeyey in ay geeriyootay Makaay Weheliye Toxoow. Maxkamadu: markii ay aragtay marag furka in dhaxalkeeda ay iska leeyihiin dhaxltooyada sare ku xusan oo keli ah. Maxkamadu: markii ay aragtay maragfurka sugitaanka mulkiyada goofka. sidaas darted maxkamadu iyadoo cuskaneysa markhaatiyaasha maxkamada horyimid waxay sugeysaa geeridda Marxuum Makaay Weheliye Toxoow, dhaxalkoobka iyo tarakada sare ku qoran, waxay ku qortay diiwaanka guud ee maxkamada, waana sugitaan ansax ah oo waafaqsan shareecadda islaamka.

Gudoomiyaha Maxkmadda
Dr. Maxamuud Maxamed Daahir,



Sawirada Dhaxaltootada Reer Makaay iyo sugayaashooda

Dhaxalkoobka	Reer	Makaay	Weheliye	Toxoow



Handwritten signature: *[Signature]*

Signature of the Notary Public

Notary Public

Handwritten number: 065587

3500	3506	3507
3463	3479	3478
3452	3477	3476
3450	3475	3474
3458	3473	3472
3459	3471	3470
3456	3469	3468
3454	3467	3466
3452	3465	3464
3451	3463	3462
3376	3372	3371
3374	3390	3391
3372	3388	3389
3370	3386	
3368		
3369		

3495	3494
3493	3492
3491	3490
3489	3488
3487	3486
3485	3484
3483	3482
3481	3480
3408	3409
3406	3407
3404	


3503	3500
3502	3501
	3500
	3499
	3498
	3497

Looking West
 Zone F3
 Calibrated

DECI MO HODON
 SCALE 1=2000

Godhra Kalidhar
 HASANI

Godhra





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 29/01/2023

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamed Ibraahim Afrax** oo ka Wakiil ah Iibsade **MAHAD ABDI** Dukumiintiga **Original+Aato** Beeca Dhulka ee **Rep No. 498/W.P.N/23, Tr. 22/01/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	MAHAD ABDI
Cabirka	20X30
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	3472-3474-F3
W.M.L	8666/2017, Tr. 27/05/2017 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Beeca	22/01/2023
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Wakiilka Iibsade: Aniga oo ah **Maxamed Ibraahim Afrax**, Leh Tel No. **0616466622**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **MAHAD ABDI**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamed Ibraahim Afrax

maxamed Ibraahim



FOOMKA BIXIN WAKAALAD ORIGINAL

REF 498/T.P.N/23

Tr:22/01/2023

Magaca Milkilaha

Amel Cali Axmed
C/Nuur Aasan Cabdi

Magaca qaadaha: →

C/Nuur Aasan Cabdi

Meeshuu deganyahay →

Mustuno

Telfoonkiisa: →

5999410

SAXIIXA BIXIYAHA:

Amel Cali Axmed

SAXIIXA QAADHA:

Amel Cali Axmed